


HAYSTAYAASHA OGGOLAANSHAHAA: GARO MASUULIYADAHAAAGA!

Haddii aad u baahan tahay oggolaanshaha dhismaha ama duminta gudaha Boston, waxaad leedahay masuuliyadaha waafaqsan Xeerka Badbaadada Dhismaha.

- Haystayaasha oggolaanshaha waa inay soo gudbiyaa Warbixinta dhaarta ah ee Qorshaha Badbaadada Goobta, warbixin dhaar ah oo caddaynaya inay diyaariyeen oo hirgelin doonaan Qorshaha Badbaada Goobta mashruuca u gaarka ah ee qeexaya ilaalinta la qorsheeyay ee ka timid khataraha suuragalka ah. Qofka haysta oggolaanshu sidoo kale waa inuu caddeyaa in mashruucoodu u hogaansami doono dhammaan shuruucda caafimaadka iyo badbaadada OSHA ee ku habboon.
- Haystayaasha oggoolaanshu waa inay haystaan Ka warhaynta Qorshaha badbaadada si loo hirgeliyo Qorshahooda Badbaadada Goobta. Qorshaha ka warhaynta waa inay ku jiraan Jihaynta Badbaadada Goobta, oo ku qoran luqad shaqaalahu fahami karaan, iyo Kullamada Badbaadada Xiliga shaqada ka hor.
Fadlan Ogow: Jihaynta ama tababarka kullamada xiliga shaqada ka horeeya ma beddelaan tababarka caafimaadka iyo badbaadada loo baahan yahay.
- Haystayaasha oggolaanshaha waa inay magacaaban OSHA 30 mida la ansixiyay ee Isku duwaha Badbaadada Goobta mashruuicyada dhismaha ka wayn 50,000 oo fuudh oo labba jibaaran ama mashruuicyada duminta dhismayaasha 4 dabaq ah ama ka wayn.



MAXAA KU XIGA?

Ka hel xeerka buuxa iyo ilaha dheeraadka ah ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan aalada badbaadada dhismaha iyo tababarka bogga boston.gov/construction-safety

SU'AALAH? NALA SOO XIDHIIDH!

✉ isd@boston.gov

📞 617-635-5300



CITY of **BOSTON**

Dhismaha iyo Duminta Hawl galada

Qof kastaa waxa uu u qalmaa deegaan shaqo oo badbaado ah



Inspectional Services



Worker
Empowerment

"Shaqaalahu waxay u qalmaan inay dareemaan **badbaado** iyo **ilaalin** markay shaqada ku jiraan. Wuxaan ku faanayaa inaan saxeexay Xeerka Badbaadada Dhismaha iyo Duminta oo **ahmiyada saaraya caafimaadka** iyo **badbaadada shaqaalahayaga.**"

- Duqa magaalada Michelle Wu

WAA MAXAY XEERKA BADBAADADA DHISMAHU?

Laga bilaabo Diisambar 1, 2023, Xeerka Hawlgalada Badbaadada Dhismaha iyo Duminta waxa uu u baahnaan doonaan goobaha dhismaha iyo duminta gudaha Boston ee raadinaya oggolaanshaha Waaxda Adeegyada Baadhida inay soo gubiyaan Warbixinta dhaarta ah ee Qorshaha Badbaadada Goobta, la qabto Jihaynta Badbaadada Goobta iyo Kullanka Badbaadada Xiliga shaqada ka hor, oo la doorto Isku duwaha Badbaadada Goobta mashruucyada waa wayn.

Ujeedada xeerku waa in la xaqijiyo in dhammaan dhismayaasha iyo hawl galada duminta gudaha Magaalada Boston loo qabto qaab ilaaliya caafimaadka, fayo qabka, iyo badbaadada shaqaalahu iyo dad waynaha.

SHAQAALAHU DHISMAHA: GARO XUQUUQDAADA

- Goob kasta oo dhisme iyo dumintu gudaha Boston waa inuu lahaa Qorshaha Badbaadada Goobta mashruuca u gaarka ah ee sheegaya khataraha suuragalka ah ee goobta iyo nidaamyada badbaadada diyaarka ah. Qorshaha waa in si sanadle ah loo cusboonaysiyyaa iyo/ama haddii xaalada goobtu isbeddelaan.
- Shaqaalahu waa inay ku helaan Jihaynta Badbaadada Goobta ee Qorshaha Badbaadada Goobta luqad ay fahmi karaa. Shaqaalagu sidoo kale waa inay soo xaadiran Kullamada Badbaada Xiliga shaqad aka hor.
- Shaqaalahu dhismaha mashruucyada ka wayn 50,000 fuudh afar jibaaran ama mashruucyada duminta ka wayn 4 dabaq waa inay hastaan gaadhida Isku duwaha Badbaadada Goobta wakhiyada oo dhan.

Haddii loo shaqeeyahaagu aanu bixin ilaalintan, waxaad cabasho u gudbin kartaa Waaxda Adeegyada Baadhida addoo soo wacaya **617-635-5300** ama iimayl u soo diraya **isd@boston.gov**.

Xeerka Badbaadada Shaqo iyo Caafimaad (OSHA) waxay xaq u siinaysaa dhammaan shaqaalahu goob badbaado oo shaqo. Loo shaqeeyahaagu waa inay ku ilaaliyan goobta shaqada mid ka xor ah khataraha caafimaadka iyo badbaado la yaqaano. Wuxaad xaq u leedahay inaad ku soo xarayso cabashada OSHA addoon ka baqan aargoosi. Si aad cabasho u soo xarayso, soo wac **800-321-6742** ama booqo **osha.gov/workers/file-complaint**.

FULINTA

Waaxda Adeegyada Baadhitaanka Magaalada Boston waxay soo saari kartaa xad gudubyada, shaqo ka joojin, kala noqoshada oggolaanshaha, oo waxay ku soo rogtaa ganaaxyo gaadhaya \$300 dadka oggolaanshaha haysta, horumariyayaasha qandaraaslayaasha guud/maareeyayaasha dhismaha, iyo qandaraas hoosaadlayaasha lagu helo inaanay u hogaansamin xeerka.

